Minnesota Department of Health

TUBERCULOSIS (TB) PREVENTION AND CONTROL PROGRAM

# Daweynta Tiibishada Qarsoon (Latent Tuberculosis) (TB) Cudurka Isoniazid iyo Rifapentine (INH-RPT)

Baaritaanada laguu sameyay waxay muujiyeen in aad qabtid cudurka TB qarsoon ama LTBI. Tani macnaheeda waxay tahay in jeermiga TB ku jiro jirkaada kuuna keeni karo xanuun.

Jeermiga TB kuma gaarsiiyo waxyeelo mana ku fido dadka kale. Waxay u muuqataa sida in jeermiga hurdo. Haddii jeermiga TB soo kaco, wuxuu kuu keeni karaa xanuun. Tani waxaa lagu magacaabaa cudurka TB ee firfircoon. Waxaad TB ku faafin kartaa dadka kale haddii aad qabtid TB firfircoon.

## Sidee ayaan isaga ilaaliyaa cudurka TB ee firfircoon?

Waxaad qaadan kartaa daawo si aad uga hortagtid cudurka TB ee firfircoon. Isoniazid iyo Rifapentine (INH-RPT) waa dawooyin leysla wada qaato oo lagu daweeyo LTBI. Waxay dilaan jeermiga TB qarsoon ka hor inta aysan kuu keenin xanuun. Waxay qaadan kartaa bilal badan si daawada u disho jeerminga TB maxaa yeelay waxay leeyahiin xoog.

Waxaad la kulmi doontaa takhtarkaada ama kalkaaliyaha hal maalin todobaadkii muddo 12 todobaad si aad u heshid una qaadatid INH-RPT. Waxaa ugu fiican in aad raashin la'aan qaadatid dawooyinkaada. Haddii caloosha ku qasan tahay, waa hagaag in lala qaato qiyaas yar oo raashin ah.

## Maxay tahay sababta loogu baahan yahay in aan qaato daawo haddii aan dareemin xanuun?

Waa sahlan tahay in la dilo jeermiga TB ee qarsoon ka hor inta aysan soo kicin kaddibna aadan ku xanuunsanin.

## Maxaa dhaca haddii aan qaadan waayo daawada?

Haddii aadan qaadanin INH-RPT, haddii aad gaftid maalmo badan, ama joojisid in aad qaadatid daawada ka hor inta takhtarkaada iyo kalkaaliyaha aysan kuu sheegin, waxaa dhici karto in aad ku xanuunsatid cudurka TB ee firfircoon. Waxaa muhiim ah in la dilo jeermiga TB si aad adiga iyo qoyskaada u heshaan caafimaad.

## Maxaa dhaca haddii aan horay u qaadatay talaalka BCG?

BCG waxay caruurta ka badbaadisaa noocyada darran ee TB hase ahatee waxay shaqeyaan dhowr sanno keliya. Ma kaa badbaadin karto LTBI ama cudurka TB ee firfircoon. Haddii aad horay u qaadatay BCG, waa in aad weli qaadatid LTBI si aad u badbaadisid naftaada iyo dadka kale.

## Maxaa dhaca haddii aan bixin karin INH-RPT?

Weydii takhtarkaada ama kalkaaliyaha sida aad daawada TB oo lacag la'aan ah uga heli kartid Minnesota Department of Health Tuberculosis Program (Barnaamijka TB Waaxda Caafimaadka Minnesota).

## Maxaa dhaca haddii aan guuro?

U sheeg takhtarkaada ama kaalkaaliyaha ka hor inta aadan u guurin gobol kale ama magaalo kale. Waxay kugu kaalmeyn karaan in aad sii waddid qaadashada daawada TB kaddib marka aad guurtid.

## Maxaa loo baahan yahay in aan ka ogaado daweynta LTBI?

- Ha cabbin beer, fiino, ama qamrada kulul, ilaa aad ka dhameysatid daweynta LTBI. Cabbitaanka qamrada adiga oo qaata daawada LTBI waxay waxyeelo gaarsiin kartaa beerkaada.
- U sheeg takhtarkaada dawooyinka kale aad qaadatid.
- Iska ilaali in aad xaamilo noqotid inta aad qaadaneysid INH-RPT. Waxaad isla markiiba wacdaa takhtarkaada ama kalkaaliyaha haddii aad xaamilo noqotid.

**Inta badan dadka, dhibaato kuma qabaan qaadashada INH-RPT. Qaar ka mid ah dadka waxay qabaan dhibatooyinka, sida:**

- Qandho in ka badan saddax maalin
- Cunto xumo ama la dareemo daal.
- Caloosha qasan ama mattag
- Calool xanuun
- Kaadi madow (midabka shaaaha ama qaxwada)
- Maqaarka ama indhaha oo jaalo ku noqda
- Nabarada maqaarka iyo cuncunka
- Kabaabyada ama dareenka oo ka taga gacmaha ama cagaha

**Haddii aad isku aragtid qaar ka mid ah dhibatooyinkaan:**

1. Jooji in aad qaadatid daawada.
2. Waxaad isla markiiba wacdaa takhtarkaada kalkaaliyaha. Ha suggin ballankaada xiga.



Qaado daawadaada sida takhtarka ama kalkaaliyaha ku faraan. Haddii aad gaftid maalmo aad u badan, waxaa dhici karto in daawada aysan shaqeynin.

**Adkeey dhamaan ballamadaada caafimaadka.** Takhtarkaada ama kalkaaliyaha ayaa hubsan doono in daawada si wanaagsan kuugu socoto.

Ballankeyga xiga daweynta TB:


Taariikhda:

Waqtiga:

Takhtarka ama kalkaaliyaha:

Goobta:

Telefoonka:




Minnesota Department of Health
Tuberculosis (TB) Prevention and Control Program
P.O. Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
www.health.state.mn.us/tb